FAAFINTA الرسمية RASMIGA الجريدة

# DAWLAD PUNTLAND EE SOOMALIA

## لولاية أرض بونت الصومال

**Sanadka 13-aad. Garowe 06 December, 2011** **Lam.12**

**Faafinta bil walba soo baxda** جريدة الشهرية

***Qaybt Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawladda Puntland***

Qiimuhu waa Sh.So 10,000 rukun walba . Sanadkii waa Sh.So 170,000 dalka gudihiisa, dalka dibaddiisa Sh.So 500,000 rukunka la waydiisto, waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilawdaa 1-da January. Qiimaha qoritaan F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So 3,000, rukunka iyo qoritaanka waxaa la waydiistaa qeybta maamulka Faafinta rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha barriga ee wasaaradda maaliyadda.

---

## TUSMADA

**Qaybta Koowaad**

**Xeerka Difaacaha Xuquuqda aadanaha Puntland**

**Qaybta labaad**

**Xeer**

**Waxba ma leh**

**Qeybta Saddexaad**

**Talooyin, Isgaarsiin, Ogaysiis, Iidheh IWM.**

***Sharci Lr 11. ee 06/12/2011, kuna saabsan Xeerka Difaacaha Xuquuqda aadanaha Puntland***

**DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA**

ولاية بونت لاند الصومالية

Madaxweynaha Dawladda Puntland

**PUNTLAND STATE OF SOMALIA**

**Sharci Lr.11 ee December 06, 2011, kuna saabsan Xeerka Difaacaha Xuquuqda aadanaha.**

Markuu arkay: Dastuurka Dawladda Puntland qodobkiisa 80-aad;

Markuu arkay: Ansixinta Golaha Wakiilada Puntland ee Summad XGGW/DPL/122/2011 ee 26/11/2011;

Markuu tixgeliyey: Muhiimadda xeerkani u leeyahay Dawladda Puntland.

## Wuxuu soo saaray

Xeerkan soo socda:

### Qodobka 1-aad

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen Xeerka Difaacaha Xuquuqda aadanaha Puntland

### Qodobka 2-aad

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala keydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee DPL.

### Qodobka 3-aad

Dhaqangalka xeerkani wuxuu noqonayaa maalinta 16-aad laga bilaabo maalintuu faafinta rasmiga ah ee Dawladda ku soo baxay, kaas oo laga baahinayo idaacadaha, baahinta ka dib ayaa xeerkani sharci noqonayaa, cid kastana ay waajib ku tahay inuu dhawro kuna dhaqmo xeerkan.

**Dr. Cabdiraxmaan Maxamed Maxamuud
Madaxweynaha Dawladda Puntland**

| | |
|---|---|
| **DAWLADDA PUNTLAND** | **PUNTLAND STATE OF** |
| **EE SOMALIYA** | **SOMALIA** |
| **GOLAHA WAKIILLADA** | **HOUSE OF REPRESENTATIVES** |
| **Xafiiska Guddoomiyaha** | **Office of the Speaker** |

**Ref:- XGGW/DPL / 122 /2011** **Garoowe,Sabti** **Date:- 26/11/2011**

**Ku:- Madaxweynaha DPL**

**Garoowe**

**Ujeeddo:- Ansixinta Xeerka Difaacaha Xuquuqda Aadanaha Puntland**

**Guddoomiyaha Golaha Wakiiladdu:-**

| | |
|---|---|
| **MARKUU ARKAY;-** | **Dastuurka DPL Qodobkiisa 64-aad.** |
| **MARKUU ARKAY;-** | **Soo gudbinta Madaxweynaha MW/DPS/784/2011 ee 28/07/2011 kuna saabsan Xeerka Difaacaha Xuquuqda Aadanaha Puntland.** |
| **MARKUU TIXGELIYEY:-** | **Baahida loo qabo Xeerkan.** |
| **MARKUU DHAGEYSTAY:-** | **Doodii iyo Go'aankii Golaha Wakiillada** |

**WUXUU GUDDOOMIYEY:-**

**Ansixinta Xeerka Difaacaha Xuquuqda Aaadanaha Puntland.**

**Allaa Mahad Leh**

**Cabdirashiid Maxamed Xirsi**

**Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.**

Guddoomiyaha Golaha Wakiillada
Speaker of the House of Representatives
PUNTLAND STATE

**DAWLADDA PUNTLAND**
**EE SOMALIYA**

**PUNTLAND STATE OF**
**SOMALI**

**Xeer Madaxweyne Lr, ______ Arbaca, July/27/2011 kuna saabsan Xeerka Xuquuqul Aadanaha Puntland**

## Qaybta 1-aad

## Cutubka 1-aad

## Qodobka 1-aad

### Erey Bixin

1. **Difaacaha xuquuqda aadanaha waxaa loola jeedaa**:- U doodaha xuquuqda Aadanaha.
2. **Xuquuqaha aasaasiga ah**:- waxaa loola jeedaa kuwa Dastuurka Puntland u gaar yeelay Muwaadinka.
3. **Wakiillada Gobollada ee difaacaha xuquuqda Aadanaha waxaa loola jeedaa:-** ku xigeenada Xafiiska Gobollada ee difaacaha Xuquuqda Aadanaha.
4. **Hawl-waddeennada xafiiska xuquuqda aadanaha waxaa loola jeedaa**: shaqaalaha ka shaqaya xafiiska difaacaha xuquuqda aadanaha.
5. **Xuquuqda Aadanaha waxaa loola jeedaa:**- Xaqa qofku leeyahay in loo dhowraana ay waajib tahay.
6. **Xuquuqda dhaqaale waxaa loola jeedaa**:- Wuxuu qofku xaq u leeyahay inuu hanti yeesho.
7. **Xuquuqda bulsho waxaa loola jeeddaa**: In qofku bulshada ku dhexnoolaado, isla markaana uu ilaaliyo xuqauuqda bulshada, bulshaduna xuquuqdiisa ilaaliso.
8. **Xuquuq dhaqameed waxaa loola jeedaa**: Xuquuqda qofku leeyahay oo ah hidaha iyo dhaqanka suubban.
9. **Xuquuqda Madani waxaa loola jeedaa**:- Xuquuqaha gaarka u ah muwaadinka.
10. **Xuquuqda siyaasadeed waxaa loola jeedaa:-** In muwaadinku wax doorto lana dooran karo, inuu axsaabta siyaasadeed ka qeyb geli karo iyo inuu u tartamo jago siyaasadeed, si waafaqsan Dastuurka Puntland.
11. **Xuquuqda Ra'yiga iyo xorriyatul qawlka waxaa loola jeedaa:-** Ilaalinta Xuquuqda Muwaadinka ee ra'yiga, cabiridda iyo fekerka.

## Cutub 2-aad

## Qodobka 2-aad

## Dhismaha Xafiiska Difaacaha

Dawladda Puntland waxay dhistay Xafiiska Difaacaha Xuquuqda Aadanaha.

## Qodobka 3-aad

## Xarunta Guud ee Xafiiska Difaacaha

Xarunta guud ee xafiiska Difaacaha Xuquuqda Aadanuhu waa Caasimadda Dawladda Puntland ee Garoowe. Wuxuuna laama ku yeelanayaa dhammaan Degmoooyinka iyo Gobollada Dalka.

## Qodobka 4-aad

## Hawl-wadeennada Xafiiska

Hawl-wadeennada Xafiiska difaacaha iyo taaba gelintiisa xuquuqda aadanaha waa:-

B) Difaacaha iyo taabo geliyaha xuquuqda aadanaha.

T) Wakiillada Gobollada ee Xafiiska Difaacaha Xuquuqda aadanaha.

J) Hawl-wadeennada Xafiiska Difaacaha Xuquuqda aadanaha.

## Qodobka 5-aad

## Shuruudaha lagu Xulanayo Difaacaha

Qofka loo dooranaayo difaacaha xuquuqda aadanaha waa inuu buuxiyaa shuruudaha soo socda.

1. Waa inuu yahay muslim ku dhaqma Diinta Islaamka ahna muwaadin Puntland.
2. Waa in aanay da'diisu/da'deedu ka yarayn 40-sanno.
3. Waa inuu leeyahay aqoon iyo waaya aragnimo la xiirta Xuquuqda aadanaha.
4. Waa inuu leeyahay anshax wanaagsan, dhowrsoonaan, karti iyo xil gudasho.
5. Waa inuusan ka tirsanayn urur siyaasadeed iyo mid diineed oo xag jir ah.
6. Waa in aanay Maxkamadi xukun ku ridey Shantii sano ee ugu danbaysay.
7. Waa inuu leeyahay akhlaaq iyo dhaqan toosan, yahayna shakhsi ku sifoobay daacad iyo dhex-dhexaadnimo.

## Qodobka 6-aad

## U tartamaha Jagada Difaacaha.

Golaha xukuumadda ayaa soo gudbinaya magacyada Murashaxiinta u tartamaya Jagada Difaacaha Xuquuqda Aadanaha. Golaha Wakiilladuna waxay ku dooranayaan habka doorashada Golaha Wakiillada.

## Qodobka 7- aad

## Muddada Xil-haynta

Mudada Xilhaynta Difaacaha Xuquuqda aadanaha waa (5) Shan Sano Dibna waa loo soo dooran karaa

## Qodobka 8-aad

## Xilka Qaadista Difaacaha.

Xil ka qaadista difaacuhu waxay ku iman kartaa:-

1. Geeri:
2. Xil ka fariisasho qoraal ah oo uu u gudbiyo Madaxweynaha iyo Golaha Wakiillada lagana aqbalo.
3. Gelid fal danbiyeed ku cadaaday ama lagu qabtay isagoo/iyadoo fal dabbiyeed faraha kula jira/ta.
4. Inuu gudan kari waayo xilkiisa sababo la xiriira xil gudasho la'aan iyo mid caafimaad oo ay caddeeyaan Guddi dhakhatiir Wasaaradda Caafimaadka Puntland aqoonsan tahay.
5. Inuu ku xadgudbo shareecadda Islaamka, Dastuurka iyo qawaaniinta dalka.
6. Difaacaha Xuquuqda aadanaha waxaa xilka lagaga qaadi karaa codbixin saddex meelood laba (2/3), Xubnaha Golaha Wakiillada marka ay sugnaato mid ka mid ah sababaha ku cad qodobka 98-aad ee Dastuurka Puntland.

## Qodobka 9-aad
## Magacaabidda Wakiillada Gobollada.

Magacaabidda Wakiillada Gobollada ee Xafiiska Difaacaha Xuquuqda aadanaha waxaa soo jeedinaya Difaacaha xuquuqda aadanaha wuxuuna u soo gudbinayaa Madaxweynah si uu u ogolaado.

## Qodobka 10-aad

## Xilka Qaadista Wakiillada Gobollada ee Xafiiska Difaacaha.

Wakiillada Gobollada ee Xafiiska Xuquuqda aadanuhu waxay xilkooda ku waayi karaan.

1. Geeri
2. Xil ka fariisasho qoraal ah oo uu soo gudbiyo Difaacuhu, Madaxweynuhuna ka ogolaado.
3. Uu galo fal danbiyeed ku caddaaday ama lagu qabtay isagoo/iyadoo faraha kula jira/ta:
4. Xil gudasho la'aan mas'uuliyadeed iyo mid Caafimaad oo ay caddeeyeen Guddi Dhakhatiir Wasaaradda Caafimaadka Puntland aqoonsan tahay:
5. Inuu ku xadgudbo shareecada Islaamka, Dastuurka iyo qawaaniinta dalka.
6. Inay lumiyaan waajibaadkii dhex-dhexaadnimo ee loo xilsaaray dano gaar ah awgeed.

## Qodobka 11-aad

## Ujeedada Xafiiska Difaacaha

1. Xafiiska Difaacaha Xuquuqda aadanaha iyo Wakiilladiisa Gobollada, waxaa loo dhisay dhowrista xuquuqda aadanha.
2. Ilaalinta Xuquuqda Muwaadiniinta.
3. Xafiiska xuquuqda iyo taaba gelinta xuquuqda aadanaha waxaa lagu maamulayaa dhammaan hawlaha la xiriira gafka/gafafka, gaboodfalada iyo tacadiyada laga galo xuquuqda aadanaha.
4. Ilaalinta xoriyaadka asaasiga ah ee muwaadinka sida ku cad shareecada islaamka iyo dastuurka Puntland.
5. Xafiiska Xuquuqda aadanaha wuxuu dhawraa, ilaaliyaa, difaacaana xadgudubyada xorriyaadka iyo xuquuqda aadanaha.
6. Wuxuu ka jawaabaa cabashooyinka muwaadiniintu u soo gudbiyaan.
7. Wuxuu baaritaana ku sameeyaa cabashooyinka, natiijada baaristana wuxuu u gudbinayaa Hay'addaha ay khusayso, iyadoo natiijada warbixinta iyo xalkeedaba loo marayo hay'adaha Dawladda sida ay u kala sarreeyaan

## Qodobka 12-aad

## Awoodaha iyo Xilalka Xafiiska Difaacaha.

Awoodda iyo Xilalka Difaacaha Xuquuqda Aadanaha waa:

1. Ka hortegidda xadgudubyada Xuquuquda Aadanaha, isagoo talabixin siinaya Ha'adaha waddaniga ah oo ay arrintu khusayso.
2. Ku wacyigelinta dadweynaha iyo masuuliyiinta dawladda muhiimada ay leedahay dhowrista Xuquuqda aadanah ee ku cad Shareecada Islaamka iyo Dastuurka Puntland, isla markaana waafaqsan Heshiisyada Caalamiga ah ee Xuquuqda Aadanaha.
3. Inuu Difaaco Xuquuqda aadanaha ee Dastuurka iyo shuruucda kale ay qeexeen.
4. Inuu baaro cabashooyinka ay muwadiniinta ama ururada Bulshadu ka sheeganayaan Xuquuqdooda Bini'aadanimo, uuna gaarsiiyaa ha'adaha dawliga ah iyo kuwa wadaniga ah natiijada baaristiisa, isagoo raacinaya talo soo jeedintiisa la xiriirta dammaanad qaadka aadanaha.
5. Inuu taageero dadka lagu sameeyo Xad-gudubyada Xuquuqda Aadanaha ka dhanka ah uuna ka difaaco Maxkamada horteeda ama si guud .
6. Kormeerka Goob kasta oo lagu sameeyo ama lagu tuhunsan yahay in lagu Gabood falo Xuquuqda Aadanaha.
7. Soo saarista warbixin sannadeed la xiriirta xaaladda Xuquuqda Aadanaha ee Puntland.
8. Difaacaha iyo wakiilladiisu waxay waydiimo ku samayn karaan cid-kasta oo xirrir la leh arrin baaritaankeeda xafiisku gacanta ku hayo.
9. Difaacaha iyo wakiilladiisu markay waajibaadkooda gudanayaan waxaa ay leeyihiin awoodaha baaritaan ee xaqiiqo raadis, waxayna u gudbiyaan natiijada baarista hay'adaha ay khusayso.
10. Difaacaha iyo wakiilladiisu waxay awood u leeyihiin inay baaraan xad-gudubyada aadanaha ee ka yimaada been abuurasho dano gaar ah laga leeyahay ee ku xad-gudubka xuquuqda muwaadiniinta.
11. ilaalinta xuquuqda aasaasiga ah ee ku xusan Dastuurka Dawlada Puntland.

## Qodobka 13-aad

## Habka Fadhiya Xafiiska

1. Xafiiska Difaacaha xuquuqdu wuxuu sameysanayaa xeer hoosaadkiisa iyo hannaankiisa shaqo.
2. Fadhiyada xafiiska waxaa lagu qabanayaa xarunta dhexe ee xafiiska iyo meelaha kale ee laysku raaco.
3. Go'aamada iyo awaamiirta xafiiska waxaa hay'addaha wadaniga ah oo ay khusayso u gudbinaya difaacaha xuquuqda aadanaha.
4. Difaacaha xuquuqda aadanuhu natiijada warbixinta ku xad gudubka xuquuqda wuxuu hay'adaha dawladda ugu gudbinayaa siday u kala sareeyaan:
5. Hadii xafiisku u baahdo wuxuu adeegsan karaa aqoon-yahanno ka caawiya hawshooda farsamo.

## Qodobka 14-aad

## Cidda loo xulayo Difaacaha iyo Wakiillada Gobollada

Difaacaha iyo wakiilladiisa Gobollada Puntland waa in aanay ahayn shaqaale dawladeed, Xubno Golaha Wakiillada, Xubin ka mid ah Xisbiyada Siyaasadeed iyo xubno ka mid ah Ciidamada qalabka sida ee dawladda midkoodna.

## Qodobka 15-aad

## Waajibaadka iyo xilalka Agaasimaha Xafiiska Maamulka

1. Agaasimaha Maamulka ee Xafiiska Difaacaha Xuquuqda aadanaha wuxuu hoos yimaadaa difaacaha xuquuqda aadanaha, wuxuuna ku shaqeeyaa awaamiirta difaacaha.
2. Agaasimuhu wuxuu mas'uul ka yahay fulinta go'aamada difaacaha xuquuqda aadanaha, isuduwidda dhammaan hawl-maalmeedka Xafiiska iyo hawl-gelinta shaqaalaha difaacaha.
3. Agaasimuhu wuxuu ka qayb galaa shirarka difaacaha iyo wakiilladiisa ee Gobollada Puntland.
4. Wuxuu diyaariyaa hadal qoraalada isagoo aan wax cod ah ku lahayn:
5. Wuxuu diyaariyaa Miisaaniyad Sannadeedka iyo xisaab xirada Xafiiska.

## Qodobka 16-aad

## Hawl wadeennada Hoose ee Xafiiska

Hawl-wadeennada hoose ee Xafiiska Xuquuqda aadanaha waxaa lagu qaadanayaa:-

1. Tartan furan.
2. Aqoon, Hufnaan iyo Hawl karnimo.

## Qodobka 17-aad

## Ka Reebanaanta Xafiiska Difaacaha

1. Waxaa ka reebban Difaacaha ama wakiilladiisa in ay fara geliyaan dacwadaha ka socda Maxkamadaha.
2. Marka laga reebo dacwad hab socodkeedii dib-u-dhac sabab la'aan ahi ku yimid ama ku xad-gudub caddaan ah maamulku kula kacay.

## Qodobka 18-aad

## Derajada Difaacaha iyo Xubnaha Gobollada.

1. Difaacaha Xuquuqda aadanuhu wuxuu Daraja ahaan u dhigmaa Garsoore Maxkamdda Sare.
2. Derajada Xubnaha kale waxay la mid yihiin Derajada Gudoomiyayaasha Maxkamada Racfaanka ee Gobollada.

## Qodobka 19-aad

## Dhaarta

Difaacaha iyo wakiilladiisa xuquuqda Aadanaha inta aanay bilaabin shaqada waxay marayaan dhaarta Dastuurka Puntland ku cad.

## Qodobka 20-aad

## Burin

Xeer kasta oo ka hor imaanaya xeerkan ama aan la socon karin waa la buriyey.

## Qodobka 21

## Dhaqan-galka Xeerkan

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka Golaha Wakiilladu ansixiyo, Madaxweynuhu Saxiixo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dawladda Puntland.

**Dr, Cabdiraxmaan Maxamed Maxamuud**

**Madaxweynaha Dawladda Puntland.**